



Qoysaska PPS oo Loo Soo Bandhigayo App La Yiraa Remind

Waalidiinta iyo Daryeelayaasha PPS ee Qaaliga ah,

Waxa aynu ogsoonahay waqtigani kala guurka ah ee waxbarashadii lagu qaadanayey dhismayaashii iskuulada dhexdooda aynu uga guureyno waxbarasho ku salaysan in guryaha dhexdooda lagu qaato inta ay iskuuladii xiran yihiin. Haddaba, si aan u sii wadno sidii aan ula shaqeyn jirnay maamulayaasha, macalimiinta iyo la taliyaashu markii ay joogeen dhismayaasha iskuulkada ardaydeenu waxaan jeclaan lahayn idiin la xiriiri karno idinka iyo ardaydiinaba iyada oo la ilaalinayo nabadgelyada qalabka aan ku wada xiriirneyno iyo dhammaan wixii idiin gaar ahba. Sababtoo ah waxa aan iskaashi la sameynay [Remind](#) sidii ay noo siin lahayd gole dhammaanteen aan kuwada xiriirno.

Remind ma bedeli doonto Google Classroom ama SeeSaw. Kuwaasi waa golayaal ay PPS ansixisay in ardayda loogu diro casharada ay ka soo shaqeynayaan/ama fasaladooda iyaga oo muuqaal ah kula xiriiraan. Remind waa qalab aad u wanaagsan oo idinka caawinaya sidii qofba qofka kale la xiriiri lahaa. Waxa ay sidoo kale bedeli doontaa waxyaabihii ardayda, macalimiintu, la taliyaasha iyo maamulka ay qaban jireen qof ahaan, sida shaqada iskuulka marka lagu siinayo in aad soo qabato, saacadihii shaqaalaha xafiiska, inaad su'aalo weydiiso, inaad hesho cid kaa caawiso shaqadii lagu diray, in aad la hadasho la-taliyaha iskuulka adigoo kala hadlaya arrimo aan daneyneyso ama walaac aad qabto., iwm. Remind wuxuu kuu ogolaanayaa inaad ku diro fariin degdeg ah, inaad telefoon ka dirsato, inaad xusuusin ka dirto, inaad fiidiyo iyo sawiro , iyo in ad Dugsiyada Dadweynaha Portland u oggolaato in ay dhammaan dabagal ku sameeyaan cid kasta oo aad kula xiriirtay.

Bandhigani waxaa qeyb ka ah, in ay dhammaan furataan koonto (account) rasmi ah sida macalimiinta, waalidiinta, daryeelayaasha qoyska iyo ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland. Maalmaha soo socda waxaad heli doontaan email ama fariin degdeg ah (text message) oo idinka iman doonta Remind. Haddaba waa inaad raacdaa tallaabooyinka ku qoran emailka ee sida loo furto Koontada. [Waa tani fiidiyow tusaale idiin ah](#) sidii aad u arki lahayd sida ay Remind u shaqeyso.

Haddii ay jiraan wax su'aalo ah oo aad qabto kuna saabsan sida loo isticmaalayo Remind, fadlan waxaad si toosa ula xiriirtaa maamulaha iskuulkaaga. Waxa aan ku faraxsanahay fursada aan goyskiina kula soo xiriireyno waqtigani!